AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Caafimaadka

## Markaad timaaddo Australia

Isla markiiba ka dib markaad timaaddo qofka caseworkerkaaga ama proposerkaaga ayaa kaa caawin doona:

1. Inaad iska-diiwaangeliso Medicare-ka
2. Inaad u tagto dhaqtarka si loo hubiyo caafimaadka iyo in la hubsado in tallaalkii qoyskaaga uu dhan yahay.

## Medicare-ka

Medicare-ka waa nadaamka daryeelka caafimaadka qaranka Australia. Medicare-ku wuxuu bixiyaa helitaanka adeegyada caafimaadka iyo isbitaalka lacag la'aanta ama kabidda ah. Si loo diiwaangeliyo, waxaad u baahan doontaa dokumantiyadaada safarkaaga sida caddaynta aqoonsiga. Markii aad iska diiwaangeliso Medicare-ka waxaa lagu siin doonaa kaarka Medicare-ka. Waxaad u baahan tahay inaad sidato mar kasta oo aad aado dhaqtarka ama haddii aad aado isbitaalka.




## Dhaqtarka qoyska ama Dhakhtarka cudurada guud (General Practitioner - GP)

Waxaad u baahan doontaa inaad hesho 'dhaqtarka qoyska'; qof aad ku kalsoon tahay kaas oo wax ka ogaan doona qoyskaaga iyo baahiyaha caafimaadkooda. Dhaqaatiirtan waxaa loo yaqaan General Practitioners ama GPs. Waxay bixiyaan caawimaadda caafimaadka guud ee badiba jirooyinka guud iyo kuwa qaba xanuunada Daashad (karooniga) ah kuwaas oo ku nool guriga. Ayadoo ka duwan waddamada qaarkood markii ay lagama maarmaan tahay in la aado isbitaalka si loo arko dhaqtar, Australian GPs badanaa waxay ku shaqeeyaan guryaha ama xafiisyada (qalliinka) ama kilinikada xaafadaha ku dhexyaal. Dadku waxay badanaa u tagaan dhaqtarka ku dhow meesha ay ku nool yihiin. Mar kasta waxaad xor u tahay inaad iska baddesho dhaqtarada haddii aadan ku faraxsanayn ama ku qanacsanayn adeegyada ay bixiyaan.

Fadlan u sheeg GP-gaaga haddii aad u baahan tahay turjumaan markii aad ballan samaynayso. Dhammaan GP-yadu waxay heli karaan turjumid lacag la'aan ah mar kasta ayagoo sii maraya haya'dda Translating and Interpreting Service (TIS National) ayadoo laga wacayo 13 1450.

## Daryeelka takhasuslaha

Wixii daaweyn ah xanuunnada gaarka ah, dhaqtarka qoyskaaga ama GP-gaaga wuxuu kuu diri karaa dhaqtarka specialist ah kaas oo khabiir ku ah xanuunada qaarkood. Guud ahaan, waxaad u baahan doontaa inaad hesho meel-u-dirid ka socota dhaqtarka ama isbitaalka si aad u awoodo inaad aragto specialist.

Dhaqaatiirta specialist ah way ka qaalisan yihiin in loo tago GP-yada. Waxaa badanaa adag in la helo ballan degdeg ah oo laga samaysto specialist waana inaad sugtaa dhowr asbuuc ama bilood.

## Isbitaallada

Waxaa jira isbitaalo dadweyne iyo kuwo gaar ah oo ka jira Australia. Isbitaalada dadweynaha waxaa maalgeliya dowladda waana u lacag la'aan bukaan-socotada marka la raaco Medicare-ka. Isbitaallada gaarka ah waxay bukaan-socodka si toos ah uga qaadaan adeegyadooda. Medicare-ku waxay bixin doontaa qaybtii ujrooyinka hase ahaatee bukaan-socodka waa inay bixiyaan faraqa.

## Farmashiistaha/kimiistaha

Farmashiisteyaasha, waxaa kaloo loo yaqaan kimiisteyaasha, waxay bixiyaan daawooyinka-la-qoro (rijeetada) iyo caafimaadyada kala duwan iyo agabyada is-qurxinta. Daawooyinka-la-qoro waxa keliya oo la heli karaa ayadoo laga keeno rijeetada dhaqtarka ama GP-ga. Si loo helo daawooyinka qoraalka ah qiimo jaban, waxaad tustaa kaarkaaga Medicare-ka iyo kaarkaaga daryeelka caafimaadka Centrelink farmashiyaha markaad lacagta bixinayso.

Farmashiistuhu wuxuu heli karaa turjumaan lacag la'aan ah markii uu bixinayo daawooyinka asagoo ka wacaya Translating and Interpreting Service taleefanka 13 1450.

Waxaa kaloo jira daawooyin kuwaas oo laga gadan karo farmashiga ama kimistaha ayadoon warqad dhaqtar ama mid GP aysan jirin. Xulanti daawooyinka guud ah waxaa kaloo laga gadan karaa supermarket-yada iyo dukaamada macdaarada ah.

## Daryeelka Da'dayda (My Aged Care)

Daryeelka Da'dayda wuxuu ka caawiyaa dadka waaweyn, qoysaskooda iyo carers-kooda inay helaan macluumaadka ku saabsan daryeelka da'da iyo adeegyada ayadoo loo marayo website-ka My Aged Care. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.myagedcare.gov.au ama ka wac xarunta xiriirka ee My Aged Care 1800 200 422.

## XUSUUSNOW

Waxaad isticmaali kartaa Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda oo lacag la'aan ah si lagaaga caawiyo ballamaha caafimaadkaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac 13 1450, ka eeg www.tisnational.gov.au/en/Non-English-speakers

## Lacag-bixinta daryeelka daaweynta

### Medicare-ka

Medicare wuxuu bixiyaa daaweynta lacag la'aanta ah ama kabidda ah oo ay bixiyaan xirfad-yaqaannada caafimaadka sida dhaqtarada, takhasusleyaasha, kuwa okiyaalaha qora, iyo duruufaha gaarka ah dhaqaatiirta ilkaha iyo xirfadleyaasha caafimaadka midaysan. Waxay kaloo bixisaa daaweyn lacag la'aan ah iyo hooy markaad tahay bukaan-socod dadweyne oo ku jira isbitaalka dadweynaha.

### Caymiska caafimaadka gaarka ah

Waxaad iska bixin kartaa caymiska caafimaadka gaarka ah. Tan waxay ku siinaysaa helitaanka isbitaalka gaarka ah waxayna dabooli doontaa qarashyada daaweynta qaarkood ee dhaqaatiirta, oo ay ka midka yihiin adeegyada sida daaweynta ilkaha iyo okiyaalaha indhaha kuwaas oo aan guud ahaan uusan daboolayn Medicare-ku.







### Biilka Bulk billing ah

Dhaqaatiirta qaarkood waxay diyaarsadaan biilka ‘bulk billing’ ah taas oo macnaheedu yahay in dhaqaatiirtu aqbalayaan manfacyada Medicare-ka sidii ayadoo lacag-bixin buuxda ah ee adeegga. Haddii uusan dhaqtarkaagu lahayn biilka ‘bulk bill’ ka ah waxaad u baahan tahay inaad iska bixiso qarashka dhaqtarka aadna ka codsato lacag-celin qaybtaada Medicare-ka.

### Ujradda go’an

Ujradda go’an (ama ‘qorshaysan’) waa qarashka ay samaysey dowladdu ee noocyada kala duwan ee Medicare-ka adeegyada caafimaadka xaqa-u-leh. Waxa keliya oo laguu celinayaa ujradda go’an oo ay kuu celinayso Medicare-ku. Dhaqaatiirta qaarkood waxay ka qaadaan wax ka badan ujradda go’an waa inaad adigu bixisaa faraqa.

## Naafo

Wixii macluumaad dheeraad ah, oo ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada si loogu taageero dadka iinta leh iyo qoysaskooda iyo daryeeleyaashooda ka eeg www.dss.gov.au kana raadi ‘Disability and Carers’.

## Caafimaadka dhimirka/la-talinta

Haddii aad dareemayso murogo ama aad niyad-jabsan tahay ama aad qabto dhibaato la-qabsiga nolosha Australia, waa inaad raadsataa la-talinta. La-hadal dhaqtarkaaga waxayna kuu diri karaan dhaqtarka cilmi-nafsiga ama la-taliye. Dareemadaas waxay noqon karaan kuwa guud, gaar ahaan markii aad la kulanto isbaddalada nolosha oo waaweyn. Waxaa muhiim ah in caawimaad loo raadiyo arimaha caafimaadka dhimirka. Waxay u daran yihiin sida kuwa arimaha caafimaadka jidheed waxaana loo daaweyn karaa si guul ah.

Golaha adeegyada ee dadka ka badbaada jirdilka iyo saska ama aafooyinka (FASSTT) waa adeegyo loogu talagalay daaweynta takhasusleyaasha ee dhibaneyaasha qaxarka iyo jirdilka. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.fasstt.org.au

Adeegyadan waxay siiyaan taageerada caafimaadka dhimirka ee qof kasta oo ku nool Australia. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg:

- www.beyondblue.org.au
- www.lifeline.org.au
- www.mindhealthconnect.org.au

## Ku-jiridda caafimaad-qabka

Sida ugu fiican oo looga hortago jirada waa in lagu noolaado qaab-nololeed caafimaad qab ah.

- Xadaynta khamriga
- Sigaarka ha cabbin
- Si joogto ah jimicsi u samee – waa hab fiican in aad la kulanto dadka cusub iyo in aad caafimaad qabto
- Si caafimaad-qab ah wax-u-cun – Australia waa waddan leh warshado beereed waaweyn sidaas darteeed dukaamada waxaa ka buuxa noocyo furuud, qudaar iyo hilib ah.






Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyey

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM